Somaliska
Skola

Dugsiyada

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratigaiga, waa arrin dabiici ah in dhammaan ardayda ay helaan aqoonta loogu baahan yahay suuqa shaqada iyo bulshada ba. Aqoonta waxay aadenaha siisa awooda horumarinta shaqsiyeed, noloshooduna waxay ku yeelataa saamayn. Sidaas awgeed, fursada waxbarashada marna ma noqon karto arrin dad qaarkood oo keliyaa la siiyo. Teeda kale, aqoonta waxaa lagu horumariya, iyadoo la kordhiyo tirada dadka ka faa'iideystan. Barashada heerka sare ah waa saldhigga wada simanaanta iyo cadaalada dalka Iswiidan.

Dusiyada dhammaantood waa in ay noqdaan dugsiyo heer sare ah
Haddii tobbankii arday ay sagaal dugsi sare u gudbaan iyaago haysto shahaado fiican, hal-na la reebo xaaladaas anagu raali kama nihin. Haddii la kordhiyo tirada macallimiinta, markaas ardayda dhammantood waxay helayaan fursad ay ku helaan taageera iyo aqoonta loogu baahan yahay sidii ay ku gaaran ujeedada waxbarashada. Muruqgelinta kordhinta tirada macallimiinta iyo aqoonyahnnada kale ee dugsiyada ayaa la hirgelin doona. Hadafkii ahaa in la qoro macallimiin iyo aqoonyahanno kale, kuwaso tiradooda gaareeyso 15 000 waxay suurtagal noqon donta saannadkan 2006.

Dugsiyada awood ahaan ugu liito waxay u baahan yihiin taageero dheeraad ah. Sannaooyinka fooda nagu suu haayo, waxaa biloow ahaan dugsiyada ugu awood liita lagu maalgelin doona lacag dhan 225

maljuun karoon. Awooda-dhaqaaleed ee cusub waxaa loo adeegsan doona akhriska iyo horumarinta luqada ee ardayda asalkooda shisheeyeha ah, taaso khuseeyso luqada iswiidishka iyo afkooda hooyo. Waxaa kalo mudnaanta koowaad la siin doona isku dawaridka dugsiga iyo qoysaska ardayda. Tilaabada ku xigta waxay noqon doonta in dugsiyada ugu awood liito, la siiyo fursad ay ku qortaan bareyaal tiradooda gaareeyso 1 000 qof.

Arrimaha horumarka habka waxbarashada iyo barbaarinta iyo kala duwanaansha waa in dugsiyada dhammantood laga siiyaa mudnaanta koowaad. Dugsiyada gaar ahaan loo maamulo waxay noqon karaan kuwa dhamaystir ahaan loo adeegsado. Laakinse dhisida dugsiyada cusub ee maamulka degmooyinka ka madaxbannaan hoos u ma dhigi karaan heerka wabarashada haddii heerkaas la barbardhigo dugsiyada maamulka degmooyinka. Halista keenida gooni u bixida waa in hab xasilan looga fiirsado markii la go'aaminaayo ruqsad siinta dugsiyada cusub ee gaar ahaanta loo maamulo. Teeda kale waa in aad loo xoojiya lug ku yeelansha maamulka degmooyina ee dugsiyada maamulkooda ka madaxbannaan. Karoonka canshuurta ee kasto oo la geliyo dugsiyada waa in toos u galaa waxbarashada ardayga. Dugsiyada oo qaab shirkadeed loo maamulo, waxay kaalmo-dhaqaaleed dowladda ka helayaan haddii faa'iidada shirkada ay dib ugu malgeliyaan shirkada sida ay u hagaajiyaan hawlaha waxbarashada.

Cidna la ma cidlayn karo

Cidna – gabar ama wiil, dugsiga laguma cidlayn karo. Carruurta way kala duwan yihiin, waxaana la heli karaa siyaabo kala duwan ee wax lagu bari karo, laakinse dhammaantooda waxay xaq ku lee yihiin aqoonta. Sidaas awgeed, waxaa muhim ah in ardayda iyo waalidintooda ba la siiyo warbixin oo aanan mugdi ku jirin oo ku saabsan heerka dadaalka waxbarashada ardayga u ku sugan yahay. Waxaa la xoojin doona dabagalka heerka aqoonta ardayga ee sagalka sano ugu horeeyo. Laga bilaawo 1da janaayo 2006 dhamaan ardayda dhigata dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe waxay xaq u lee yihiin qorsheha horumarka ee ardayga u gaarka ah, kaaso wadajir u deji doonaan ardayga, waalidkiisa iyo macallinkiisa, waa in hab aanan mugdi ku jirin loo soo bandhiga shuruuda ardayga u ku gaari karo hadafka waxbarashada. Qorsheha horumarka ee ardayga u gaarka ah waa in hab joogto ah maamulka dugsiga u kormeera.

Sida macallimiinta ay daqsi u shaacbixiyaan haddii arday uu baahan yahay taageero dheeraad ah, waxaa He'yadda Dugsiyada la xilsaaray in ay soo diyaariso imtixaanada akhriska iyo xisaabta.

Dugsiyada cusub ee casriga ah

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga kuma qanacsanin boqolkiiba 85 ee 22-jiryada haysto saddex sano ee ah waxbarashada dugsiga sare. Sidaas awgeed, waxaan taageero dheeraad ah siina

ardayda barashada dugsiga sare kala kulmo dhibaato. Waxaan kalo muruq dheeraad ah gelinaa sidii an u horumarinno oona sare ugu qaadno heerka qorsheha gaarka ah ee dugsiga sare. Dhammaan ardayda oo dhigata qorsheha gaarka ah ee dugsiga sare, waxay heli doonaan taageera ee u baahan yihiin, sida ay u soo galaan oona ay dhamaystiraan prograamka qaranka. Waxaan kalo hogaajin doona prograamada gogoldhigga xirfadaha. Waxa la bilaaway dugsi sare ee casri ah, isku daworidka maddooyinka ugu muhimsan iyo maadooyinka xirfadaha ayaa la xoojin doona, tilaabqaadashada gobolada ee wadashaqaynta maamulada degmooyinka iyo hey'adaha shaqada ayaa la dhirigelin doona.

Wax ku bediladeeda

Siyaasadayda waxbarasha ee xisbiga socialdemokratiga waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Waxay keeneen talo ah in la adeegsado imtixaan u qalmida dugsi dhigashada iyo in toddoba jiryada la siiyo shahaado ku sheeg. Haddaba su'aasha waxay tahay; Sideeba lagu kicin doona hamiyada waxbarashada cunug berri hore lagu yiri, adiga waxbarashada kuma wanaagsanid? Isbahaysiga midigta ee dalka Iswiidan waxay doonayaan carruurta dhammantood aysan helin fursada waxbarashada ay xaqa uu lee yihiin. Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo waxay kalo ay doonayaan in ay ciribtiraan barnaamijka waxbarashada dugsiyada sare ee ardayga u gaarka ah, ayna hoos u dhigan hamiyada ardayda dhigata barnaamijka gogoldhigga xirfadaha. Isbahaysiga midigta waxay doonayaan in ay hirgeliyan siyaasad midigeed ee gaboowday, taaso ku salaysan kala socida, kordhinta kooxaha bulshada kala soocaan, hoos u dhigida aqoonta iyo awooddarrada tartanka aqoonta.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?